GUNDERSEN HEALTH SYSTEM®

Siyaasadda

| | |
|---|---|
| **Mowduuca** | Siyaasadda Biilasha Qofka Bixiyo iyo Aruurinta (Self-Pay and Collection Policy) |
| **Nambarka Furaha** | PLHCRC-1055 |
| **Qeybta** | Wareegga Dakhliga |
| **Qeybta Hoose** | Maamulka Wareegga Dakhliga |
| **Nooca** | Waax |
| **Xariirka** | Lindsay Krambeer |
| **La Baddalay** | 03/31/2023 |

## Tixraacyada

GL – 2555 Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda
GL – 3001 EMTALA: Aruurinta Macluumaadka Maaliyadda
29 CFR §§ 1.501(r)-4, 5, iyo 6
Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka
Sharciga Badbaadinta Bukaanka iyo Daryeelka La Awoodo (Patient Protection and Affordable Care Act) (ACA)
Lifaaqa Dambe 1

## Lagu Dabaqi Karo

Dhamaan bukaanka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics (halkaan, wadajir ahaan loo yaqaan sida "Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics") ee adeegyada daryeelka caafimaadka ka qaata Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics.

## Tafaasiisha

Ujeedada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waa in aan muujino naftena lana adeegsado heer sare xagga daryeelka bukaanka, aqoonta, cilmi baarista iyo horumarinta caafimaadka bulshadaha ay u adeegto. Aragtideeda waxay tahay in la xoojiyo caafimaadka iyo fiyoobida bulshadena isla markaasna la kobicyo naf kasta aan taabano, sida bukaanka, qoysaska, iyo shaqaalaha.

Siyaasadda Biilasha Qofka Bixiyo iyo Aruurinta Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics (Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Self-Pay and Collection Policy) waxay waafaqsan tahay ujeedadeeda iyo waxa ay aaminsan tahay. Waxaa looga dan leeyahay in lala kulmo sharuudaha lagu dabaqi karo ee dhamaan sharciyada federaalka, gobolka, iyo deegaanka, kana mid ah iyaga aan la soo koobin, qeybta 1.501(r) ee Internal Revenue Service Code (Xeerka Adeegga Dakhliga Gudaha) ee 1986, sida loo baddalay, iyo sharciyada ku hoos jira, iyo Federal Patient Protection and Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka La Awoodi Karo iyo Badbaadinta Bukaanka Federaalka) (ACA).

Si Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics si mas'uul ah u maamusho ilaheeda maaliyadda, isla markaasna kaalmo siiso bukaanka qaba baahida maaliyadda, bukaanka waxaa laga filaa in ay wax ku daraan kharashka ku baxa daryeelkooda sida ku saleysan awoodda uu qof ahaan u leeyahay in uu bixiyo iyo/ama sharuucaha ceymiskooda. Siyaasadaan Self-Pay and Collection Policy (Siyaasadda Biilasha Qofka Bixiyo iyo Aruurinta) iyo Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda) waxay aasaas u ahaan doonaan dhaqanka aruurinta Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics xagga xisaabaadka bukaanka. Siyaasadaan waxay aasaas u noqon doonaan dhaqanka aruurinta GHS ee la xariira xisaabaadka bukaanka. Siyaasaddaan waxay sharaxdaa habka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics u xalliso waajibaadka bukaanka ka saaran lacag bixinta iyo waxay bukaanka ogeysiisaa siyaasadda kaalmada maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics (Financial Assistance Policy).

Sida waafaqsan siyaasadaan, ma jiraan talaabadaha aruurinta aan caadiga ahayn ee laga qaadi doono bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, ka hor inta aan la sameynin dadaal macquul ah oo lagu raadinaayo haddii bukaanka ama ballanqaadaha uu xaq u leeyahay kaalmada sida hoos timaado Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics) (FAP).

Bukaanka la siiyay daryeelka degdegga ama daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, waxaa la siin doonaa fursad ay ku dalbadaan kaalmada maaliyadda, sida waafaqsan ACA iyo sharciyadeeda fullinta/ Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ma samayn doonto takoor ku saleysan da', kacsi, isir, caqiido, midab, itaal darri, jihada kacsiga, asal qaran, ama xaaladda socdaalka marka laga gaaro go'aaminta kaalmada maaliyadda.

Siyaasadaan waxay raacsan tahay dallacaadda la xariirta adeegyada daryeelka caafimaadka ee Gundersen Lutheran Medical Center, Inc. iyo/ama Gundersen Clinic, Ltd.

## Fullinta

**SHARAXAADDA**

Sifeynta soo socoto waxaa lagu dabaqi karaa dhamaan qeybaha siyaasadaan.

**Muddada arjiga:** Muddo 120 maalin laga bilaabo bayaanka ka-dhaafidda kowaad kaddib.

**Deynta Xun:** Waajibka saaran bukaanka in uu qof ahaan iska bixiyo balse la bixinin in ka badan 120 maalin kaddib marka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics go'aan ka gaaro cidda mas'uulka ka ah maaliyadda kaddibna bayaanka biilka kowaad, kaddib marka laga ruqseeyo, u dirto bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, ama waafaqsaneyn qorshaha lacag bixinta lagu heshiiyay.

**Kaalmada Xanaanada Musiibada:** Kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesha ee dakhliga soo gala sannadkii ka badan yahay 400% Federal Poverty Level (Heerka Saboolnimada Federaalka); iyo hanti ka yar in la'eg 600% Heerka saboolnimada Federaalka; iyo waajibaadka maaliyadda ka dhasha adeegyada caafimaadka laga qaatay Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics in ka badan 25% wadarta dakhliga soo gala qoyska sannadkii.

**Kaalmada Xanaanada la Dhimay:** Kaalmada maaliyadda laga helo dhimis - ku dhisan miisaanka dakhliga - ee la siiyo bukaanka xaqa u yeesho, ama ballanqaadaha, marka dakhliga guud ee soo gala qoyska sannadkii u dhexeeyo 200 - 400% Federal Poverty Level (Heerka Saboolnimada Federaalka) lagu dabaqi karo.

**Talaabada Aruurinta aan Caadiga Ahayn (ECA):** Talaabo kasta oo ka soo horjeeda qof mas'uul ka ah bixinta kharashka ku baxa adeegga Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics siisay ee u baahan habka sharciga ama xukun, ama macluumaad oo ku saabsan ballanqaadaha (ballanqaadeyaasha) lagana geeyo wakaaladaha warbixinta deynta ama xafiisyada deynta. ECAyada kama mid ah in bukaanka ama ballanqaadaha loo diro biil, telefoonka oo laga waco bukaanka lana weydiiyo su'aalo macquul ah, ama xisaabta oo lagu wareejiyo dhinac kale si loo soo aruuriyo sida waafaqsan sharuudaha 29 CFR 1.501(r)-6(b)(2) iyo in aan la isticmaalin habka sharciga ama xukunka.

**Tilmaamaha Saboolnimada HHS** (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha NH) (NH Department of Health and Human Services)

**<u>Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) (FPL)</u>:** Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) wuxuu isticmaalaa heerarka isbaddala xagga tirada qoyska iyo inta ay kooban tahay si loo ogaado qofka saboolka ah waddanka Mareykanka. Muddo ka muddo, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka (United States Department of Health and Human Services) waxay ku casriyeysaa Diiwaanka Federaalka (Federal Register) sida hoos timaada awoodda qeybta hoose (2), Section 9902 Title 42 ee United States Code. Tilmaamaha FPL ee iminka jira waxaa laga tixraaci karaa http://aspe.hhs.gov/POVERTY/.

**Kaalmada Maaliyadda:** Kaalmada la siiyo bukaanka xaqa u yeesha ama qofka (dadka) mas'uulka ah, ee laga yaabo in ay la kulmaan dhibaatada maaliyadda, in laga qaado dhamaan ama qeyb ka mid ah waajiyaabka maaliyadda xagga degdegga ama daryeelka, caafimaad ahaan lagama maarmaankaah, ay Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics bixiso.

**Daryeelka Lacag La'aanta:** Ka dhaafidda 100% waajibka maaliyadda saaran bukaanka xagga adeegyada caafimaadka xaqa loo leeyahay ay bixiso Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics lana siiyo bukaanka xaqa u yeesha, ama baalanqaadeyaashooda, marka dhakhliga guud ee soo gala qoyska sannadkii yahay ama ka yar yahay 200% Federal Poverty Level (Heerka Saboolnimada Federaalka).

**Ballan Qaadaha:** Qofka aan ahayn bukaanka oo mas'uul ka ah lacag bixinta biilka bukaanka.

**Dallacaadda Guud:** Wadarta dallacaadda ku saleysan sicirka buuxa ee loo dajiyay bixinta adeegyada daryeelka bukaanka ka hor inta aan dhimista laga goynin dakhliga.

**Soo Koobidda Luqadda Fudud:** Oraah qoran oo soo si cad, oo kooban u soo koobta Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda) si loo hubsado in akhristaha u fahmo dhakhso iyo si dhamaystiran.

**KAALMADA LACAG BIXINTA**: Qorshaha lacag bixinta ay ku heshiyaan Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics iyo bukaanka labadaba, ama ballan qaadaha bukaanka, xagga khidmaha laga bixiyo jeebka. Qorshaha lacag bixinta wuxuu xisaabta ku darri doonaa daruufaha maaliyadda bukaanka, xisaabta laga rabo, iyo lacag bixintii la soo dhaafay.

**Xisaabaadka Qofka Bixiyo ama Mas'uuliyadda Maaliyadda:** Xisaabaadka waajibka ku ah bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka in ay toos u siiyaan Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics. Waxaa ka mid noqon kara baaqiga soo hara kaddib marka la bixiyo sheegashada ceymsidka ee laga rabo bukaanka aan ceymiska qabin, ama baaqiga la rabo kaddib marka la sameeyo isku celcelinta sida waafaqsan Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics).

**Dhimista La Siiyo Ceymis Laawaa (Uninsured Discount):** Dhimista la siiyo bukaanka ama ballan qaadeyaasha aan qabin ceymiska dhinaca saddaxaad. Dhimista la siiyo qofka aan ceymiska ku jirin waxay la'eg tahay xisaabta guud ahaan la soo dallaco (AGB).

**<u>XALLINTA XISAABTA</u>**

Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay isu xil saartay in ay kaalmada maaliyadda siiso bukaanka, ama ballanqaadeyaasha kuwa aan haysanin ceymis ama kuwa haysta ceymis liito, ay ku adkaan doonto in ay bixiyaan

kaharashka daryeelka laga siiyay Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics xagga adeegyada xaqa loo leeyahay. Waa la daba geli doonaa bukaanka loo aqoonsaado in ay awood u leeyahiin in ay iska bixiyaan adeegga. Hababka aruurinta ku qoran siyaasadaan waxaa si joogto ah loogu dabaqi doonaa dhamaan bukaanka iyadoo aan la fiirinin xaaladda ceymiska, waxayna u hoggaansami doontaa sharciyada lagu dabaqi karo iyo ujeedada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay si cad bukaanka, ama ballanqaadeyaasha bukaanka, u sheegi doontaa helitaanka barnaamijyada kaalmada maaliyadda, iyo waxa laga filaayo lacag bixinta. Tani waxaa la samayn doonaa inta uu socdo wareegga dakhliga.

Waa siyaasadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics in ay reebto bixinta kharashka ku baxa xaaladaha caafimaadka degdegga ka hor inta bukaanka aan la siinin adeegyada ama ogolaata hawlaha aruurinta ee lagay yaabo in ay soo farageliso siinta daryeelka caafimaadka degdegga (fiiri siyaasadda GL-3001).

Dhamaan macluumaadka maaliyadda ee laga helo bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, waxay ahaan doonaan qarsoodi.

**Xaqiijinta Mas'uuliyadda Maaliyadda Bukaanka:** Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay qaadi doontaa talaabo macquul ah si loo xaqiijiyo waajibaadka lacag bixinta bukaanka. Waxaa la qaadi doonaa talaabdo si loo aqoonsado bixiyeyaasha kharashka dhinaca saddaxaad si bukaanka loogu kaalmeeyo xallinta biilashooda iyo Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay lacag bixin ka raadsan doonta dhamaan bixiyeyaasha kharashka dhinaca saddaxaad si loogu kaalmeeyo bukaanka in ay xalliyaan biilashooda. Waxaa lagu dhaqaaqi doonaa hababka ku habboon qaanta lagu sheegto dhinaca saddaxaad waqtiga ku habboon si loo gaaro xukunka ku habboon qaanta. Haddii loo baahdo iyo haddii ay tahay la sameyn karo, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay la shaqeyn doontaa bukaanka si loogu kaalmeeyo in ay xalliyaan arrimaha lacag bixinta sheegashada ceymiska.

**Xallinta Miisaaniyadda Bukaanka:** Kaddib marka bukaabka, ama ballanqaadaha bukaanka, go'aan laga gaaro mas'uuliyadda maaliyada qofka iska bixiyo, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay (i) bukaanka, ama ballanqaadah bukaanka ogeysiin doontaa fursadaha badan ee lagu xallin karo baaqiga, iyo (ii) waxaa la siin doonaa siyaasadda kaalmada maaliyadda, arjiga kaalmada maaliyadda, soo koobidda luqadda sahlan, iyo siyaasadda biilka qofka bixiyo iyo aruurinta. Haddii bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka uusan awoodin in uu bixiyo baaqiga la rabo muddo labaatan iyo kow (21) maalin, waxaa loo sheegi doonaa fursadaha kale ee la heli karo si loo xalliyo baaqiga qofka bixiyo, kana mid ah qorshooyinka lacag bixinta, iyo/ama kaalmada maaliyadda. Waxaa si macquul ah loogu dadaali doonaa in loo sheego bukaanka, ballanqaadeyaasha bukaanka, ee siyaasadda kaalmada maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, kaddibna waxaa la siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo arjiga kaalmada maaliyadda.

**Bayaanada Bangiga:** Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay diri doontaa ugu yaraan saddaax oraahyada kala soocan ee xisaabaadka qofka bixiyo ee boosta ama email ahaan loogu diro cinwaanka la ogsoon yahay ee ballanqaade (ballanqaadeyaasha) kasta. Hase ahatee, looma baahna oraahyo kale oo dheeraad ah kaddib marka ballanqaadaha soo gudbiyo arji dhamaystiran oo ku dalbado kaalmada maaliyadda sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda ama si buuxda u bixiyo. Waa waajib saaran ballan qaadaha (ballan qaadeyaasha) in ay bixiyaan cinwaan sax ah oo loogu soo diro warqadaha waqtiga adeegga ama marka uu guuro. Haddii xisaabta aysan lahayn cinwaan sax ah, taas macnaheeda waxay tahay in la sameeyay dadaal macquul ah. Dhamaan bayaanada qofka bixiyo waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

1. Dallacaadda adeegyada noocaas;
2. Xisaabta loo baahan yahay in uu bukaanka ama ballan qaadaha bixiyo;

3. Ogeysiis qoran oo muuqda oo la socodsiiya iyo ogeysiiya bukaanka ama ballanqaadaha in la heli karo kaalmada maaliaydda hoos yimaada siyaasadda kaalmada maaliyadda, kana mid ah nambarka telefoonka waaxda iyo cinwaanka bogga internetka halkaas oo koobiyada warqadaha, sida Arjiga Kaalmada Maaliaydda, laga heli karo;
4. Ugu yaraan mid ka mid ah bayaanada loogu diro boostada ama email waxaa ka mid ah ogeysiis qoran oo ogeysiiya bukaanka ama ballanqaadaha ECAyada la qaadi karo haddii bukaanka ama ballanqaadaha uusan dalbanin kaalmada maaliyadda sida hoos timaada siyaasadda kaalmada maaliyadda ama bixinin xisaabta leyska rabo ugu dambayn taariikhda biilka. Oraahdaan waxaa la raacin doonaa soo koobidda luqad sahlan oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda.

**Kaalmada Maaliyadda:** Macluumaadka kaalmada maaliyadda waxaa si balaaran loo bandhigi doonaa bukaanka iyo xubnaha bulshada ay Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics u adeegto. Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics FAP, Financial Assistance Application (Arjiga Kaalmada Maaliyadda), iyo soo koobidda luqadda sahlan ee FAP waxaa laga heli karaa bogga internetka siistemka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics. Koobiyada warqadaha macluumaadkaan waxaa la heli doonaa kaddib marka la codsado, mana jiro kharash lagu soo dallaco qofka.

Macluumaadka kaalmada maaliyadda, kana mid ah macluumaadka ku saabsan Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics FAP iyo tilmaamaha ku saabsan sida loola xariiro Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics loogana helo kaalmo, waxaa la siin doonaa bukaanka marka la wareysto ama la fasaxo. Macluumaadka kaalmada maaliyadda waxaa kaloo lagu heli karaa lacag la'aan, marka bukaanka codsado, waxaana si cad loogu soo dhajin doonaa isbitaalka iyo diiwaan gelinta kliinikada iyo goobaha soo gelinta, gudaha waaxda degdegga isbitaalka, iyo waxaa kaloo la soo raacin doonaa bayaanada bukaanka loo diro bil kasta.

**Qorshaha Lacag Bixinta:** Bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, waxaa kaloo la siin doonaa macluumaad ku saabsan qorshooyinka lacag bixinta. Bukaanka aan awoodin in ay bixiyaan baaqiga laga rabo muddo labaatan iyo kow (21) maalin gudahooda, waxaa loo ogolaan doonaa qorshooyinka lacag bixinta aan korsaar lahayn ilaa muddo labo (2) sanno. Habeynta qofshooyinka lacag bixinta noocaas waa in lagu sameeyo Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Customer Financial Service (Adeegga Maaliyadda Macaamilka

Haddii bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, uusan dalbanin qorshaha lacag bixinta ama haddii bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, ku guul dareysto in uu u hoggaansamo qorshaha lacag bixinta, waxaa dhici karto in xisaabta lagu wareejiyo wakaaladda aruurinta dibadda.

Haddii bukaanka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ee qaba qorshaha lacag bixinta, adeegyo laga siiyo Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, kaddibna lagu yeesho baaqi dheeraad ah uu qofka bixiyo, waxaa dhici karto in wax laga baddalo qorshaha lacag bixinta bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, si xisaabta loogu darro dallacaadda dheeraadka ah.

Qorshooyinka lacag bixinta waxaa heli kara bukaanka, ama ballanqaadeyaashooda, ee u qalma in ka yar 100% kaalmada maaliyadda, balse aan awoodin in ay si buuxdo u bixiyaan baaqiga. Qorshooyinkaan lacag bixinta waxay hoos imaan doonaan isla sharciyada lagu dabaqi karo bukaanka ama ballan qaadeyaasha aan u qalmin in la siiyo kaalmada maaliyadda.

**Muranka Biilasha:** Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay bukaanka u sheegi doontaa habka ay su'aal ku weydiin karaan ama ku qilaafi karaan biilasha. Qilaafaadka waxaa loo jeedin doonaa waaxda Customer Financial Services (Adeegyada Maaliyadda Macaamilka) ee Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics. Magaca waaxda, Customer Financial Services (Adeegyada Maaliyadda Macaamilka) iyo namabarka telefoonka aan lacaga laga qaadin loona baahan

loo dirro Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics. Waaxda Customer Financial Services (Adeegyada Maaliyadda Macaamilka) waxay ka jawaabi doontaa su'aalaha ay soo jeediyaan bukaanka muddo 30 maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka uu soo gaaro qilaafka. Xagga qilaafka u baahan baaritaan dheeraad ah, waa istaagi doonaan dhamaan talaabadaha aruurinta ilaa laga gaaro go'aan kama dambays ah oo ku saabsan xisaabta leysku qilaafsan yahay.

**TALAABADAHA ARUURINTA AAN CAADIGA AHAYN LANA QAADO MARKA AAN LA BIXININ KHARASHKA**

**Talaabadaha Aruurinta Deynta Xun:** Ma jirto xisaab lagu qaadi doonaa talaabadaha aruurinta deynta xun, ECA, muddo 120 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka kowaad kaddib marka laga ruqseeyo ka hor inta Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics sameynin dadaal macquul ah ay ku ogaato haddii bukaankaas uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Muddadaan 120 maalin waa la soo gaabin karaa haddii go'aan laga gaaro kaalmada maaliyadda, la sameeyo qorshaha lacag bixinta kuna heshiyeen bukaanka ama ballanqaadaha, iyo bukaanka ama ballanqaadaha aysan u hoggaansamin qorshaha lacag bixinta. Ma jirto talaabo aruurin oo laga qaadi doono bukaanka haddii bukaanka, ama ballanqaadaha, soo gudbiyo warqado muujiya in isaga ama iyada dalbatay ceymis hoos yimaada Medicaid, ama barnaamijyada caafimaadka kale ay dadweynaha mas'uul ka yahiin, ee laga yaabo in ay bixiyaan qaanta iyo weli laga gaarin go'aan ku saabsan xaq u yeelashada.

Ka hor inta xisaabta bukaanka loo dirin wakaaladda aruurinta, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay si macquul ah ugu dadaali doonta in ay bixiso macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda iyo waxay bukaanka ama ballanqaadaha u diri doontaa ugu yaraan saddax (3) bayaan qoran. Oraah kasta waxaa ku jira ogeysiis muuqda oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, nambarka telefoonka la diro si loo helo kaalmo, iyo cinwaanka toosan ee bogga internetka. Haddii dhamaan aan lagu guuleysanin dadaalka in xariir lala sameeyo bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, kaddibna la haynin cinwaan sax ah oo loogu diro warqadaha, xisaabta waxaa loo diri doonaa wakaaladda aruurinta.

Muddo 240 maalin laga bilaabo bayaanka kowaad kaddib marka laga ruqseeyo, haddii bukaanka, ama ballanqaadaha, soo dalbado kaalmada maaliyadda, waa la ogolaan doonaa arjiga kaddibna waa joogsan doonaan talaabadaha aruurinta inta laga gaaraayo go'aaminta xaq u yeelashada. Haddii bukaanka loo ogolaado Free Care (Daryeelka Lacag La'aanta), lama qaadi doono talaabo dheeraad ah oo lagu soo aruuriyo xisaabta. Haddii arjiilaha loo diido kaalmada maaliyadda ama loo ogolaado daryeelka la dhimay, waxaa lagu dhaqaaqi doonaa talaabo lagu xalliyo waajibka taagan. Haddii aan xal laga gaarin xisaabta ama aan la sameynin qorshe lagu xalliyo xisaabta, waxaa lagu dhaqaaqi doonaa talaabo dheeraad ah.

Haddii qofka soo gudbiyo arji aan la dhamaystirin waqtiga arjiga, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waa in ay (i) joojiso dhamaan talaabada aruurinta, (ii) siiso qofka ogeysiis qoran oo sharaxa macluumaadka dheeraadka ah iyo/ama warqadaha loo baahan yahay sida hoos timaado FAP ama foomka arjiga loo baahan yahay in la gudbiyo si loo dhamaystiro arjiga FAP iyo (iii) bixinta macluumaadka laga xariiro Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics. Arjiga wuxuu shaqeyn doonaa muddo 30 maalin laga bilaabo taariikhda warqadda loo dirray arjiilaha codsaday macluumaadkaaan. Haddii arjiilaha uusan ka soo jawaabin muddo 30 maalin gudahooda, waa la diidi doonaa arjiga.

Arjiilaha loo ogolaado kaalmada maaliyadda waxaa la siin doonaa lacagaha dib u celinta inta ka badan lacagaha loo arko in uu qabo bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka lana xariira xisaabaadka kaalmada la siiyay sida hoos timaada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics FAP. Lacag celinta waxaa lagu dabaqaa lacag bixinta dheeraadka ah ee $15.00 ama ka badan. Sida waafaqsan siyaasadaan, guud ahaan lama dheereeyo kaalmada maaliyadda xagga lacagaha lagu darro ama baaqiga hara kaddib marka shirkadda ceymiska bixiso haddii bukaanka ku guul dareysto in uu helo tixraacyo ama ogolaasho ku habboon, ama haddii kaalmada noocaas aysan waafaqsaneyn heshiiska ceymiska sidaas darteed lama soo celin doonoo lacagahaas la bixiyay.

Waxaa dhici karto in Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics adeegsato talaabadaha aruurinta marka ay daba socoto lacag bixinta laga qaado bukaanka ama ballanqaadeyaasha (i)qaba baaqi aan la bixinin in ka badan 120 maalin, aan dalbanin kaalmada maaliyadda, (ii) bukaanka ama ballanqaadeyaasha aan waafaqsaneyn qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay, ama (iii) bukaanka ama ballanqaadeyaasha aan weli si daacad ah uga shaqeynin in ay bixiyaan baaqiga ku haray.

Ugu yaraan 30 maalin ka hor inta aan la bilaabin hal ECA ama ka badan si loo helo bixinta lacagta daryeelka la bixiyo, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka siin doontaa ogeysiis qoran oo tilmaama in kaalmada maaliyadda loo heli karo dadka xaqa u yeesha, sida qofka u dalban karo kaalamda maaliyadda, iyo meesha laga heli karo FAP. Ogeysiiska noocaas ee qoran wuxuu aqoonsan doonaa ECAyada ama dhinaca kale ee loo ogol yahay ayaa ku talo jirta in ay bilowdo si ay u hesho bixinta kharashka daryeelka kaddibna muujin doonto taariikhda ugu dambeyso ee ECAyada noocaas la bilaabi karo. Taariikdha ugu dambeyso kama horeyn karto soddon (30) maalin kaddib taariikhda bukaanka ama ballan qaadaha bukaanka la siiyo ogeysiis qoran. Ogeysiiska waxaa lagu darri doonaa soo koobidda luqad sahlan oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadd, Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay si macquul ah ugu dadaali doontaa in ay afka ka ogeysiiso qofka jiritaanka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics FAP iyo sida bukaanka uu kaalmada uga heli karo habka FAP.

Kuwa soo socda waa liiska ECAyada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ku bilaabi doonto si ay u bixiyaan kharashka adeegga la siiyay: (i) u sheegidda wakaaladaha warbixinta deynta macaamilka, (ii) raacidda go'aanada sharciga, (iii) soo gudbinta qaanta, ama (iv) la wareegidda mushaarka si loo aruuriyo baaqiga harray.

**Wakaaladaha Aruurinta:** Wakaaladaha aruurinta waxaa loo adeegsan karaa in lagu kaalmeeyo baaqiga bukaanka Qof Ahaan Iska Bixiyo. Xisaabaadka laguma meeleyn doono wakaaladda aruurinta 120ka maalin hore gudahooda kaddib marka la soo saaro bayaanka kaddib marka bukaanka laga ruqseey, haddii bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka uusan u hoggaansamin qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay.

Ka hor inta aan lagu wareejinin wakaaladda aruurinta dibadda, waa la fiirin doonaa xisaab kasta si loo hubsado in Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics samaysay dadaal macquul ah si loo ogaado haddii bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Firintaan kaddib, xisaabta waxay u gudbi kartaa wakaaladda aruurinta dibadda. Xisaab kasta ama dhamaan xisaabaadka loo gudbiyo wakaaladda aruurinta waxay u hoggaansami doontaa sharuudaha kaalmada maaliyadda.

Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ma ogola luqadda ama aruurinta ku dhisan kadeed, xumaan, cabburin, been, khayaano ama marrin hababinta qareenada, wakaaladaha, ama wakiilada iyo shaqaalaha ka shaqeeyo aruurinta deynta. Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ma ogola luqadda ama aruurinta ku dhisan kadeedka, xumaanta, cabburinta, beenta,

marrin habaabinta ay ku kacaan shaqaalaheeda mas'uulka ka ah in ay deynta caafimaadka ka soo aruuriyaan bukaanka.

Dhamaan wakaaladaha aruurinta ee u shaqeeya Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay haysan doonaan heshiis qoran oo tilmaami doono in hababkooda aruurinta waajib tahay in ay waafaqsan yahiin siyaasadaha Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics iyo in ay u hoggaansan yahiin sharciyada gobolka iyo federaalka ee lagu dabaqi karo. Ugu yaraan, heshiiska noocaas waa in laga helo qodobada soo socda:

1. Haddii qofka soo gudbiyo arjiga FAP kaddib marka loo diro ama la iibiyo deynta balse ka hor inta aan la gaarin dhamaadka muddada arjiga, dhinaca waxay joojin doontaa ECAyada si loo helo lacag bixinta daryeelka.
2. Haddii qofka soo gudbiyo arjiga FAP kaddib marka la soo diro ama la iibiyo deynta balse ka horeyso inta aan la gaarin dhamaadkamuddada arjiga lana gaaro in uu xaq u leeyahay daryeelka FAP, dhinaca waxay waxa soo socda ku samayn doontaa waqtiga ku habboon.
3. Ku adkeysto hababka lagu tilmaamay heshiiska ee hubin doono in qofka uusan bixinin, iyo in aysan waajib ku ahayn in uu siiyo, dhinaca iyo isbitaalka. wadajir ahaan, in ka badan inta isaga ama iyada laga rabo in ay ka bixiso daryeelka sida qof xaq u leh FAP.
4. Haddii lagu dabaqi karo iyo haddii dhinaca (baddalkii isbitaalka) leedahay awoodda ay sidaas ku sameyso, qaado dhamaan talaabadaha macquulka ah si loo baddalo ECA (marka laga reebo iibinta deynta ama ECA kale) oo lagu dhaqaaqay kana soo horjeedo qofka.
5. Haddii dhinaca deynta ku wareejiso ama ka iibiso dhinac kale inta ay socoto muddo hawha, dhinaca waxay heshiis qoran ka heli doontaa dhinaca kale sida dhamaan xubnaha ku sharaxan baragraafkaan (c) (10).

Wakaalad kasta oo Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics kala shaqeyso xisaabaadka qofka bixiyo waxaa la siin doonaa koobiga Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Self-Pay Billing and Collection (Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Biilka Qofka Bixiyo iyo Aruurinta) and Financial Assistance Polices (Siyaasadaha Kaalmada Maaliyadda). Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay faylka gelin doontaa aqoonsi saxiixan oo ku saabsan helitaanka siaasadahaan iyo heshiiska si loogu dadaalo loogana ahaado daacad u hoggaansamida siyaasadahaan.

Haddii bukaanka ama ballanqaadaha bukaanka, dalbado kaalmada maaliyadda muddada damber ee 240 maalin laga bilaabo oraahda kowaad kaddib marka laga ruqseeyo ama 30 maalin kaddib marka loo diro ogeysiiska in la bilaabi doono talaabo sharci, arjiga waa la ogolaan doonaa kaddibna talaabada aruurinta waa la joojin doonaa inta laga ogaanaayo xaq u yeelashada. Haddii bukaanka loo ogolaado daryeelka lacag la'aan ah, lama qaadi doono talaabo dheeraad ah oo xisaabta laga qaado. Haddii arjiilaha loo ogolaado dhimista daryeelka, ama loo diido kaalmada maaliyadda, bukaanka ama ballanqaadaha waa in ay qaadaan talaabadaha ku habboon, si loo xalliyo baaqiga qofka bixiyo ama waxaa lagu dhaqaaqi doonaa talaabo aruurina kale.

**Soo Sheegidda Deynta:** Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay wakaaladaheeda aruurinta ruqsad u siisay in ay macluumaadka ku saabsan xisaabaadka bukaanka siiyaan wakaaladaha soo sheegidda deynta macaamilka.

Kiisaska qaar, waxaa dhici karto in Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics qaado talaabo sharci, ama wakaaladaheeda aruurinta, si ay bukaanka uga soo qaado baaqiga qofka bixiyo. Ma dhici karto in wakaaladda aruurinta ay talaabo sharci ka qaado bukaanka, ama ballanqaadaha bukaanka, marka aan la bixinin kharashka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, ama raadsato xukun 120 maalin kaddib muddada lagu dabaqo aysan dhamaanin iyo Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics samaysay dadaal macquul ah ay ku ogaato ahddi bukaanka uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Haddii la helo

waxaa la adeegsan karaa talaabadaha soo socda: la wareegidda mushaarka, qaanta loo qabsado hantida, iyo qaanta loo qabsado heshiiska ceymiska lana xariira kharashka ku baxa adeegyada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ee welina jiro baaqi.

Waa lala tashan doonaa Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics ka hor inta aan la qaadin talaabo sharci. Waa ka fiirin doonaa dhamaan xisaabaadka hadba sida kiisku yahay, waxaana la tixgelin doonaa xaaladda bukaanka ama xaaladda ballan qaadaha bukaanka. Maamulka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics wuxuu fiirin doonaa dhamaan hawlaha aruurinta muhiimka ah si loo hubsado in lagu dhaqaaqay dhamaan iskudayidda aruurinta qofka iskiisa u gaaro, iyo xisaabta la kullanto sharuudaha ka doodidda.

**Qaanta Lagu Leeyahay Hantida Bukaanka Dhintay Aysan Dhaxli Karin Xaas Nool:** Waxaa dhici karto in Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics qaan u qabsato hantida ma guuraanka bukaanka dhintay, haddii aysan jirin xaas nool oo dhaxasha bukaanka.

Xaaska ka hartay bukaanka dhintay, ee lagu leeyahay biilasha Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, waxaa loo haystaa in ay mas'uul ka tahay bixinta waajibaadkaas hase ahatee waa marka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics aysan bukaanka ka helin Marital Property Agreement (Heshiiska Hantida Guurka) oo ka saara hantida guurka ka hor inta aan la siinin daryeelka.

**TABABARKA SHAQAALAHA**

Tababarka shaqaalaha waxaa la siin doonaa shaqaalaha ka qeybgala isdhexgalka aruurinta. Shaqaalaha mas'uulka ka ah aruurinta xisaabaadka qofka bixiyo waxaa la siin doonaa tababar ku saabsan adeegga macaamilka, waanwaanta/xallinta xisaabta iyo xirfadaha aruurinta. Tababarka wuxuu xoogga saari doonaa Kaalmada Maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics iyo siyaasadaha Biilasha/Aruurinta iyo xilka ay iska saartay in ay dhamaan bukaanka ku daweeyso naxariis iyo xushmad. Tababarka waxay fiirin doonaa qoraalka aruurinta iyo macluumaadka kale si bukaanka loogu sheego siyaasadaha Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics.

**WAKAALADAHA ARUURINTA KORMEERKA**

Si joogto ah ayaa loo kormeeri doonaa wakaaladaha aruurinta dhinaca saddaxaad ee u shaqeeyo iyo mattala Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics si loo hubsado in ay u hoggaansamaan siyaasadaan.

**HELITAANKA SIYAASADDA DADWEYNAHA**

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics (Financial Assistance Policy), iyo siyaasadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Self-pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta) waxaa diyaar looga dhigi doonaa bukaanka iyo bulshada Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics u shaqeyso taaasoo lagu gaaro ilo kala duwan. Fadlan fiiri Tixraaca 1 si aad u heshid tafaasiila dheeraad ah.

**HIRGELINTA:**

Luqad ama aruurin kasta oo xumaan, kadeed, marrin habaabin wadata kuna kacaan shaqaalaha Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics, shaqalaha wakaaladda aruurinta deynta ama qareenada waxaa wax looga qaban doonaa hababka talaabada sixidda.

**QARSOODIGA**

Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxay suggi doontaa wararka ku saabsan bukaan kasta, xaggaa macluumaadka maaliyadda iyo sida loo qabto macluumaadka caafimaadka qofka.

**OGOLAASHADA SIYAASADDA**

Siyaasadda kaalmada maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics waxaa la siiyay oo soo ogolaaday Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Finance Committee (Guddiga Maaliyadda Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics) bishii February 2023 iyo Board (Boorka) bishii. Siyaasaddaan waxaa la fiiriyaa muddo ka muddo. Isbaddal kasta oo la taaban karo laguna sameeyo ceymiska waa in uu soo ogolaado Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics Governance Board (Boorka Maamulka Gundersen Palmer Lutheran Hospital & Clinics).